

Habeynta Dukumentiyada ku jira Galka Dukumentiyada

Waraaqaha ku habboon in Galka Dukumentiyada lagu daro

- Nuqullo ka mid ah iimayllada iyo diiwaannada wada-xiriirka.
- Tusaalooyin shaqada dugsiga ee fasallo kala duwan, hore iyo hadda, si loo muujiyo horumar ama dib-u-dhac.
- Kaadhahka natiijooyinka (Report Cards) si loo muujiyo heerka waxbarasho iyo meelaha u baahan taageero.
- Diiwaannada xaadiritaanka si loo muujiyo sida xaaladda ardayga (sida dyslexia) u saamaysay ka-qaybgalka dugsiga.
- Nuqullo qiimeyn (Assessments) iyo xogta imtixaannada gobolka.
- Dugsiga hoose: dib-u-eeg Qorshaha Akhriska Degmada (Local Literacy Plan) kuna codso natiijooyinka qiimeynta ardaygaaga.
- Jadwalka Heerarka Qaranka (National Norms Tables) ee dhammaan qiimeynaha ardaygu qaato.
- Nuqullo dhammaan qiimeynaha ay sameeyeen dugsiga iyo hay'adaha gaarka ah.
- Nuqullo qorshayaasha IEP/504 ee hadda jira iyo kuwii hore.
- Nuqullo diiwaannada caafimaadka ee khuseeya.
- Nuqul ka mid ah Ilaalinta Habraaca (Procedural Safeguards) ee ardayda leh IEP.

Sida loo habeeyo Galka Dukumentiyada

Waxay faa'iido leedahay in galka dukumentiyada lagu daro tabs si waraaqaha si fudud loo helo. Waxaad u habeeyn kartaa laba qaab:

Hab Taariikheed

- Heerarka fasallada (Preschool, K, 1, 2, iwm)
- Qiimeyn (Evaluation)
- Qorshaha IEP/504

Hab Nooc ahaan

- Shaqada dugsiga
- Qiimeynaha, report cards, iyo imtixaannada gobolka
- Qiimeyn (Evaluations)
- Qorshaha IEP/504
- Isgaarsiinta (Communication)

Habka aad u doorato habeynta galka dukumentiyada waa adiga. Waxa ugu muhiimsan waa in galka dukumentiyada kuu shaqeeyo adiga iyo baahiyahaaga.

Wixii macluumaad dheeraad ah booqo <https://www.decodingdyslexiamn.org/>

Macluumaadka la bixiyay maaha, oo aan loogu talagalay, ka dhigan talo sharci. Dhammaan macluumaadka, waxa ku jira, iyo agabka, oo ay ku jiraan cid saddexaad, ayaa loogu talagalay ujeedooyin macluumaad guud oo keliya. Waa inaad la xiriirtaa qareenkaaga si aad talo uga hesho arrin kasta oo sharci ah.

